green to go



Minneapolis
City of Lakes

Wixii macluumaad dheeri ah soo wac 311 ama booqo www.minneapolismn.gov/GreenToGo

## Xeerka konteenarada degaan-ahaan la aqbali karo

# WAXAAD U BAAHANTAHAY INAAD AATO

## DHAAFITAANNADA GREEN TO GO WAXAY JOOGSANAYAAN ABRIL 22, 2019

Badeecadaha qaar ayaa waxa laga dhaafay xeerka Green To Go. Ka-dhaafitaankan ayaa u saamaxaya ganacsiyada inay isticmaalaan badeecadaha inkasta oo aanay buuxinin shuruudaha xeerka Green To Go. Badeecadaha laga dhaafay ayaa ah:

- Koobaka iyo weelka kulayka iyo qabawga ee ay ku xardhan tahay Polyethylene (PE) ee dareeraha lagu shubto (maraqa, iwm.) , iyoand
- Daboolada polystyrene-ta adage e weelashha. Dabooladan waxa ku calaamadaysan #6 gudaha saddex fallaadhood oo isku-jeeda.

**Caafimaadka Deegaanka Minneapolis ayaa go'aamiyey ka-dhaafitaanada badeecadda inuu joogsan doono Abril 22, 2019.** Joojinta ka-dhaafitaanadan gudaha 2019, ganacsiyadu waxay haystaan waqti ay ku isticmaalaam badeecadaha u yaalla oo ay kala shaqeeyaan qaybiyayaasha inay u soo iibiyaan badeecado buuxinaya shuruudaha Green To Go. Qaabka ayaa waafaqsan qaabka waxbarista loo isticmaalay markii la beddelayey xeerka Green To Go 2014-kii.

## QODOBADA UGU MUHIIMSAN XEERKAN

*Xeerka Green To Go wuxuu dhigayaa in cuntada iyo cabbitaanka loo diyaariyey in isla-markiiba la la-isticmaalo iyo in la-qaato in lagu rito baakado dib loo isticmaali karo, dib loo weshadayn karo ama burburi kara. Caagii la digo jabin karana waa in la diga jibiyaa. Sharcigani wuxuu dhaqan galay April 22, 2015 (Maalinta Dulka).*

## YUU XEERKANI SAAMAYNAYAA?

Dhamaan dadka iyo meheradaha gada ama bixiya cuntada diyaarsan. Kuwan waxaa kamida makhaayadaha oo dhan, dukaamada cuntada kulul gada, gaadiidka cuntada lagu dhex diyaariyo, ganacsiyada cuntada ku gada bandhigyada xiliyada kala duwan.

## WAA MAXAY KONTEENARADA LAGA HADALAYO?

Daasadaha cuntada ama cabitaanka, dhalooyinka, konteenarada loogu talo galay cuntada diyaarsan sida dhalooyinka, koobabka iyo suxuunta caaga ah, iyo konteenarada cuntadadiyaarsan lagu gato.

**KONTEENARADA DEEGAAN-AHAAN LA AQBALI KARO** waa kuwa dib loo isticmaali karo, dib loo warshadeyn karo, ama la gubi karo.






Plastics:






Balaastigga la burburin karo waa innuu waafaqsanayahay heerka ASTM D6868 ama waa innay hubisay Cedar Grove ama BPI inuu yahay mid la burburin karo.

## BAAKO LAGU WAREERAYO

Ka digtoonow baakayn aan u dhamaystirnayn shuruudihii sharciga Green to Go.

Qaar kamida kartoonada lagu wareerayo midabkoodu waa buni fudud oo u eg kartoonada la burburin karo.

Haddii calaamada ku taala kartoonka uu yahay lambar lix ku dhextaala sadex falaadhood oo is cayrsanaya (hoos ka fiiri), kartoonkaasu waa polystyrene.

Kartoonkaasu ma buuxinayo shuruudihii sharciga Green To Go.

Erayada sida "green alternative," "degradable," "biodegradable," and "sustainably sourced" waa erayo xayaysiis. Macnahoodu maha in shaygaasi innuu buuxiyay shuruudihii Green To Go.

## MA KHUSEEYO

**Shayyada uusan xeerku khuseeynin:**

- Mindiyaha, Fargeedooyinka iyo malqaacadaha
- Cuudka cabitaanka lagu dhuuqo
- quddaha wax lagu qalaaqo
- Cunooyinka warshad, shirkada -cunto, ama shirkad jumladle. Bacaha khafiifka ah ee dhumucoodu ka yaryahay 10.

## GANACSIYADA AYNA KHUSEEYNIN

- Shirkadaha cuntooyinka xafladaha geeya ee shatiga ka haysta magaalada Minneapolis, magalo kale ama gobolka.
- Cusbitaalada ama guryaha xanaanda dadka waayeelka ah.

# SU'AALAHA LOOGU WEYDIINTA BADANYAHAY:

**Ganacsiyadu miyay ku qasbanyihiin inay guriga hortiisa dhigaan meel lagu rido waxyaabaha dabeeciga ah?**

Haddii ganacsigu isticmaalo Konteenarada caaga kubma, waa inay dhigaan meel lagu rido waxyaabaha dabeeciga ah. Haddiise ganacsigu isticmaalo konteenarada ka samaysan warqada kubanta oo kalia, loogama baahno inay dhigaan meel lagu rido waxyaabaha dabeeciga ah.

**Waa kuwee balaastiga la burburin karo ee buuxinaya shuruudahah Green To Go?** Kartoonada buuxin kara shuruudaha ASTM heerka D6868 ama ay hubisay in la burburin karo BPI ama Cedar Grove ayaa buuxiya shuruudaha Green To Go. Wixii su'aalo ah eek u aadan kartoonada kala xiriir bakaarkaga jumlada.

**Su'aal miyaad ka qabtaa xeerka?**

Wac 311 ama email food@minneapolismn.gov

# LAMA OGOLA

- Caaga adage ee loo yaqaan Polystyrene – waa balaastig ku calaamadsan midab kasta
- Konteenada loo yaqaano Styrofoam-ka

# KAALMADA HENNEPIN COUNTY




**Bilaash:**

- DiyCaawinaad iyo tababar.
- Qoraalada, calaamadaha, iyo qalabka kale ee waxbarasho

**Deeqaha ganacsiga illaa $50,000 ayaa diyaar oo kaa caawinaya:**

- Bilow ama horumari dib u warshadaynta, ilaalinta nadaafada, iyo barnaajimka ka hortaga qashinka.
- Gadashada haamaha qashinka iyo qalab kale
- Dib u warshadayn cusub ama adeega kharashka qaadida qashinka
- Horumarinta albaabka qashinka laga dajiyo iyo hanta qashinka xayndaabida haamaha qashinka.

Wixii macluumaada ah ee dheeraad ah (and Hennepin County contact information) visit www.hennepin.us/businessrecycling

# FAAHFAAHIN DHEERAAD AH

Wac 311 ama booqo www.minneapolismn.gov/GreenToGo

For reasonable accommodations or alternative formats please contact the Minneapolis Health Department at (612) 673-2301 or health@minneapolismn.gov. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at (612) 673-3000. TTY users call (612) 673-2626. Para asistencia (612) 673-2700
Rau kev pab (612) 673-2800 - Hadii aad Caawimaad u baahantahay (612) 673-3500.